

Somali

**Barashada luuqada,
wadajirka iyo kacaawin shaqo.**

**- Hel saaxiib iskaa wax u qabso
ah / qoys saaxiib ah**

Udgivet af:

Røde Kors

Blegdamsvej 27

2100 København Ø

DRC Dansk Flygtningehjælp

Borgergade 10

1300 København K

Forsidefoto: Peter Sørensen

Design og layout:

Helle Bjerre Østergaard

Oplag: 2000

Tryk: KLS



PurePrint® by **KLS**
Producent: Hørsholmvej 11
4100 Slagelse, Danmark

December 2020

www.vennerviservej.dk

Venner Viser Vej er finansieret
af Udlændinge- og Integrationsministeriet

Waa maxay saaxiib iskaa wax u qabso ah / qoys saaxiib ah?

Saaxiib iskaa wax u qabso ah / qoys saaxiib ah waxaa loogu talagalay dadka qaxootiga ah. Qofka wadanka Denmark hada yimi iyo qofka mudo dheer joogay ba.

Saaxiib ka iskaa wax u qabso ah ama qoys saaxiib ah markaad leedahay oo aad dooneyso inaad waqti wada qaadataan waa inuu ahaada waxqti aad labadiinaba firaqada leedihiin iyo labadiina oo raba inaad waqti wada qaadataan.

Qof ka markuu yahay iskaa wax u qabso ma aha qof komuunka ama dowlada ushaqeyya. Saa darteed lacagna kuma qaato. Qofka marka uu yahay qof iskaa wax u qabso ah waa qof caadi ah oo raba inuu ku kaalmeeyo adiga iyo qoyskaaga ba. Waxaa dhici karta caawitaankaas oo qofka iskaa wax u qabso ah ku caawinayo farxad galineyslo. Ama iney farxad galineyso barasho uu baranayo dhaqankaaga iyo la kulanka dad cusub.

Tabaruceyaashu waxay qayb ka yihiin ururrada laanqeyrta cas ama DRC Danish Refugee Council

Labada urur ba waxay leeyihiin sannado badan oo waayo-aragnimo oo ey u leeyihiin taakuleyn dadka asalkoodu yahay qaxooti.

Waxaa isku raacsan oo ku balameysaan inta jeer aad is arkeysaan iyo meesha aad ku kulmeysaan ba. Sidoo kale waa inaad ku heshiiso waxaad rabto inaad wada sameysaan.

Hadaad rabtaan intaad meel wada fariisataan baad koob kafey ah wada cabi kartaan ama hadaad doontaan cunto wada cuna. Qofka saaxiib ka iskaa wax u qabso ah wuxuu kaa caawin karaa oo uu kugu taageeri karaa wax walbo aad rabto inaad gaarto. Ha ahaato inaad ku fiicnaato luuqada dhaanishka ah ama u diyaar garowid waxbarasho ama inaad hesho shaqo.

Saaxiibka iskaa wax u qabso ku shaqeyya wuxuu leeyahay waajibaad oo ah inuusan waxa aad kawada hadashaan usheegi karin qof kale oo bini aadam ah. Sidaa darteed wax walbo oo sir xitaa waad kawada hadli kartaan.

Hadaad leedahay saaxiibka iskaa wax u qabso, komuunkana lacag ka qaadatid lacag, saameyn kuma lahaaneyso lacagta aad qaadatid oo lacagtaadi sidii ayaad uqaadaneysa.

“Midba midka kale dhaqamadiisa ayuu wax kabanayaa, tusaale ahaan, waan xusnay Ciidda Kirismaska, aad bey ufaxad badneed”

Esraa Rahal oo katimi Siiriya oo ka sheekeeneysa qoyska dhaanisha ah oo saaxiib la tahay

Muxuu qofka saaxiibka iskaa wax u qabso ah kugu taageeri karaa?

Qofka marka uu qaxootiga yahay caqabado badan oo kale duwan ayuu lahaan karaa. Qofka gebi ahaanba ku cusub wadanka Denmark waxaa lagayaaba inuu ubaahan yahay caawitan oo lagacaawinaya nolol maalmeedka. Saaxiibka iskaa wax u qabso ama Tabaruceyaashu, tusaale ahaan, waxay kaa caawin karaan akhrinta waraaqaha komuunka, isticmaalka NemID ama sida wanaagsan ee waalidiinta ula shaqeyn karaan xanaanada ama iskuulka.

Haddii aad Denmark joogtay dhawr sano, waxaa lagayaaba inaad dooneyso shaqo saad kuheli laheed, ama meel aad baragtiko ku qaadato. Saaxiibka iskaa wax u qabso ama Tabaruceyaashu waxay markaas kaa caawin karaan sidaa CV fiican u qori laheed, ama aad iskugu diyaarin laheed wadahaladka lagula yeelanayo intaan shaqada lagusiin. Qofka saaxiibka oo iskaa wax u qabso ah xitaa wuxuu kaa caawin karaa inuu isha ku hayo, haddii ay jiraan shaqooyin ka banaan magaaladaada.

Waxaad sidoo kale kala hadli kartaa qofka saaxiibka iskaa wax u qabso ama tabaruce waxbarasho. Waxaa lagayaaba qof tabaruce ah inuu waaya-aragnimo, shabakado iyo aqoon noqon kara waxtar uleeyahay.

Bulshooyinka iyo dhaqanka

Qofka iskaa wax u qabso da ah ama tabaruce wuxuu ku tusi karaa bulshooyinka magaalada oo waxaa kamid ah kooxda kubada cagta, ururka muusikada ama ururada kale oo magaalada ka jira. Waxaa dheeri ah oo qofka iskaa wax u qabso ku bari karaa bulshada dhaanishka, oo wuxuu kaaga sheekeen karaa dhaqanka, xeerar aan qornayn iyo sharciyada wadanka. Waxaa dhici karta in lagugu casuumo xaflad dhaqameed dhaanish ah la xiriirta Kirismaska ama dhalashada. Adiga xitaa waxaad la wadaagi kartaa qof tabaruce u shaqeeya hiddahaaga iyo dhaqankaaga.

“Waa dhib in la fahmo warqadaha ka socda dowladda hoose (kommunka). Mar walba aan Signe wacno diyaar ayey nootahay iney nacaawiso.”

Ahmed Rahal oo ka yimi wadanka Siiriya oo ka sheekeeneysa qoyska dhaanisha ah oo saaxiib la ah



Marka hore dhaanishka, ka dib shaqo, guri iyo guur

Mir Houssian Karimi ayaa hada dhow helay ruqsada wadista gaadiidka. 23-jirka reer Afghanistan ee qaxootiga ah ayaa sidoo kale iibsaday gaarigiisa oo isaga u gaar ah. Lacagta uu gaariga ku iibsaday wuxuu kahelay shaqodii uu ka shaqeynayay ee dukaanka Netto oo 6:30 aroornimo uu galayay. Marka Mir uusan ka shaqeyneyn Netto, wuxuu aadaa iskuulka. Wax badan ayuu ubaahan yahay inuu barto waayo Mir iskuul muusan ku soo dhigan Afghanistan. Cashirada waxaa ka caawiya Hans Jørn iyo Bente Fogh Olsen oo u ah Mir saaxiib iska wax u qabso. Dhaanisha ayuu sifiican ugu bartay labadooda. Dhoor sano ayey isbuuc walbo wada kulmayeen.

“Way igu adkaan lahayd inaan barto af dhaanishka haddii aanan halkan iman lahayn”

Mir wuxuu hada sifiican ayuu ugu hadlayaa af dhaanishka wuxuuna bilaabay inuu ku riyoodo waxbarasho makaanik.

“ Waxaan rabaa waxbarasho, shaqo, gurigeyga ka dib waxaan doonayaa inaan guursado. Inaa saas ukala hormariyo ayaan rabaa” ayuu yiri Mir

Sidan ayaad sifiican iskula jaanqaadaysaan

Marka kowaad aad wada kulmeysaan isma taqaanaan oo waxaa dhici karta inaad wax layaab leh kula noqoto kulankiina. Waxaa haboon inaad usheegto qofka tabaruca ahi sababta aad urabto inaad hesho saaxiib iskaa wax u qabso ah iyo waxaad rajaynayso inuu kaa caawiyo. Sidoo kale qof ka tabaruca waa inu isna sheega sababta u doonayo inuu noqdo tabaruc.

Sidoo kale kawada hadla inta jeer ee aad rabtaan inaad wada kulantaan. Hore usii balama.

Qaar badan baa ku balama iney kulmaan laba iyo afar jeer bishii. Waxaa dhici karta waqtiyada aad fasaxa tihiin iney kala duwan yihiin. Marka saas dareed hore usii balama oo waqtiyada aad wada kulmeysaan hore usii sameysta. Xariirkiina ha aahaado xariiq labodiinaba usimantihin.

Labo qof oo saaxiibo ah isku arka, oo goaan walbo isla gaaraya wax walbo oo aad sameeneysaan.

Midba midka kale figradihiisa iyo taladiisa ha ufur furnaado.

“Wax badan baan bartay oo ka ogaaday qofk ka yimi wadamada carbeed iyo nolasha muslinka iyo tan daqanka ba. Taas oo ii sabatay inaan dhaqankeygi aragti cusub ku fiiriyo.”

Signe Irminger oo ka sheekayneysa qoys ka Rahal oo ka yimi wadanka Siiriya oo ey u tahay saaxiib iska wax uqabso

Sidan usameysta balamaha wanaagsan

- **Usheeg sababta aad udooneyso tabaruce, saaxiib ama qoys saaxiibtinimo**

Kawada hadla waxa aad ka fileyso kulankiina.

- **Halkeed ku kulmeysaan?**

Waxaad ku kulmi kartaan gurigaaga, ama qofka tabaruca gurigiisa ama maktabadda ama goobta caruurta kuciyaarto. Sidoo kale hadaad doonta socod yar ayaad u bixi kartaan. Labadiinuba waa inaad kaqeyb qaadataan waxa aad go'aansataan inaad sameysaan. La kulankiina wuu idin fududaanayaa markaa.

- **Sidee uxariireysaan?**

Ku heshiia sidaan uwada xariiri lehedeed. Ma okay ba inaad si joogto ah isugu wacdaan? Miyey haboon tahay inaad telefon ku xariirtaan habeenimada

weekendiga, waqtiga shaqada? Ma waxaa ka haboon inaad SMS isku dirtaan, qoraalka dhaanisha miyuu ku dhibaya? Waa muhiim ina labadiinaba ka wada shaqeysaan sidaan uwada kulmi lehedeed.

Haddii mid uun howsha uu wado qof ka kale uusan ka qeyba qaadan saaxiibtinimo haboon ma noqoneyso

- **Hadey kuu suurta gali weydo inaad wada kulantaan?**

Xasuuso inaad usheegto qofka tabaruca hadey kuu suurta galiweydo inaadla kulanto.

- **Haddii ay jiraan wax aadan fors fahmin**

Wax aad fahmi weydo hadey jiraan weydii qof tabaruca ah.

Maxaa wada sameyn kartaan?

Waa fikrad aad uwanaagsan hadaad wada cunteysaan. gaar ahaan hadaad qoysas caruur leh tihiin. Waxaa kale wanaagsan inaad ciyaaro wada ciyaartaan. Ha noqoto ciyaar qof walbo iyo da' walbo ka qeyb ga karto oo aan ku xireen in lagu hadlo luuqada dhaanishka.

Waxaa kale oo fiican inaad wada daawataan telefishanka dhaanishka ama inaad wada aqrisataan joornaal. Waxaad kawada shekeysan kartaan waxa ka dhacaya Danmark iyo adduunka ba. Hadaad doontaan adiga ama qoyskaga waxaad ka shekeen kartaan waddankaaga hooyo. Tabaruceyaashu aad bey uxiiseenayaan iney dhageystaan dhaqamadiina iyo ciidahiina ba.

Fikradaha wanaagsan ee waxqabadyada

Waqtiyada firaaqada iyo nasashada


- Ku dhax lugeeya xafada, ama aada matxafka.
- Isla soo wada adeega, cunto isla sameeya oo isla wada cuna.
- Ciyaar wada ciyaara ama filim wada daawada.

Kaalmeyn baragtig ah

- Cashirada iskuulka wada sameeya.
- Luqada dhaanisha is bara (fiiri talooyinka beejka 10)
- Akhriso waraaqaha dowladda, bixinta biilasha, xisaabso biilka guriga ama codso shaqo

Ka qeybgalka bulshada deegaanka

- Isu raaca urur isboorti ama ururka xaafada.
- Isu raaca munaasabadaha maxalliga ah tusaale ahaan riwaayadaha ama muxaadarooyinka.



Dhidid wajiga iyo tababarka luqadda

Umushii kadib ayey Senet Tekleab go'aansatay iney jirkeeda dhisto. Susanne Orthmann oo ah Senet Tekleab saaxiibadeed oo iskaa wax u qabso ah ayaa uwaday xarunta jirdhiska. 3 mar isbuuci ayey mudo 4 beel ah aadayeen. Senet ayaa laylihii ey ka soo baratay xarunta jirdhiska wili sameysa. Hase yeeshee maanta waxay ku mashquulsan tahay maaraynta qoyskeeda iyo mustaqbalkeeda. Maalmahani Senet iyo Susanne cuno ayey isla karsadaan markey kulmaan.

“Wiilkaygu maalin walbo waxaan siiyaa oo uu uqaata xannaanada 3 cuno,” Uma baran inaan sameeyo qado dhaanish ah, laakiin Susanne ayaa taas i baraysa, “ayay tidhi Senet, oo asalkeeda ka timi wadanka Eriteriya (3 cuno oo kala duwan oo qadada iskuulka ah).

Senet iyo Susanne cuno ayey wada dubanayaan iyagoo sheekeysanaya oo kawada hadlaya waxay sameen doonaan marku fasaxa umusha ka dhamaado Senet.

“Waxaan rabaa shaqo oo Susanne ayaa balan iga qaaday iney iga caawineyso inaan sameysto CV

Luuqada dhaanishka

Wey adagtahay inaad lakulanto qof eenan isku luuqad aheyn. Wuu ogyahay qofka tabaruca ah muhiimka ey leedahay in luuqada dhaanisha lagu hadlo, oo diyaar wuxuu u yahay inuu kaa caawiyo barashada luuqada. Waxaa laga yaabaa inaad dhigato iskuul luuqada lagu barto. Qofka tabaruca ah/saaxiibka iskaa wax uqabso ah wuxuu kaa caawin karaa cashirada iskuulka oo guriga looga shaqeeyo. Hadaad inbadan Denmark joogtay waxaa dhici karta inaad luuqada dhaanisha taqaanid, balse aad dooneysid inaad ku hadalkii luuqada dhaanisha ku sii fiicnaatid. Hadaad dooneysid inaad luqad baratid, waxaad u baahan tahay inaad tababar xoog leg galisid. Waxaad u baahan tahay inaad hesho qaab adiga kugu habboon. Mar walbo aad luuqada ku hadashid waxay kuu noqon tababar. Hadaad jeceshahay inaad socoto ood jiiro soo gasho, waxaad ku hadashaa oo tababar ka dhigataa inta aad socotid luqadda dhaanishka. Inaad heshaan waxaad kawada hadashaan badanaa waxaa fudud marka eynan is hor fadhin. Waxaad ka sheekeysan kartaan waxa ishiina ku dhaca oo aad aragtaan. Tusaale ahaan waxaad aadaan baarkinka oo ka sheekeesta dabeecadda

Haddii labadiinuba aad xiisaynaysaan cuntada, waxaad kawada hadli kartaan khudaarta kala duwan, ama sheekeesta idinko karsanaya cuno oo ka sheekeesta cunada aad karsaneysaan. Sidoo kale waxaad isku raaci kartaan maktabada idinka oo qaadanaya buugaag dhaanisha oo fudud. Saaxiibka iska qax uqabso ayaa kaa caawin kara sidaad usameesan laheed hadaadan hore ulaheen.

Talooyin ku saabsan tababarka luqadda

- Dhageyso raadiyaha oo daawa aflaanta dhaanishka adiga oo ku daawanaya qoraalka deenishka
- Mobilka ku soodejiso appka bilaashka ah oo Duolingo ama Google Translate
- Wada Ciyaara
- Isla wada aqrista joornaalka, buugaagta iyo warqadaha ka yimaada komuunka
- Wada dhageesta heesaha dhaanishaka oo laheesa

“Markii ugu horeysay meenan wada hadli karin gabi ahaanba. Hadana af dhaanish fiican buu Mir ku hadlayaa. Mir Marka uu na soo booqdo inta badan aad buu inoo caawiyaa. Tusaale ahaan isaga ayaa jaray geedadka guriga kabaxa dhoorkii jeer ugu danbeeyay.”

Hans Jørn Fogh Olsen oo ka sheekeenaya ahaansha qoys saaxiibtinimo oo uu yahay Mir Houssian Karimi oo ka yimi wadanka Afghanistanfor Mir Houssian Karimi fra Afghanistan

Muddo intee le'eg ayaad is arkeysaan?

Ma jiraan wax sharciyo ah oo xadidaya inta aad adiga iyo qofka tabaruca ah is arki kartaan.

Qaar baa kulankooda ku istaaga marka uu qofka shaqo helo, ama uu waxbarashada dhameeyo ama luuqada dhaanishaka ku fiicnaado. Qaarna saaxiibtinimadooda intaas kuma dhamaato oo ma doonayaan iney saaxiibtinimadooda dhamaato. Mar mar dhifa waxaa dhacda in ey saaxiibtinimada ey dhamaato marka ey labada qof 1 iyo 2 mar kaliya is arkaan. Taas oo sababeysa in 2 da qof eysan isfahmeeyn oo eysan isku dabeecad aheen. Qofka ikhtiyaar ayuu u leeyahay oo markuu doono ayuu joojin karaa wada kulanka.

Hadaad dooneysid inaad joojiso wada kulanka aad la kulmeysa qofka tabaruca ah, waa inaad ogeysiisaa qofka kaa caawiyay helitaanka oo kuu helay qofka tabaruca ah. Waxaad fursad kale uleedahay inaad hesho tabaruc/saaxiib iskaa wax u qabso kale oo cusub.

“Markii hore anaga ayaa caawin jirnay Legese. Hada sheekada wey is badashay oo isaga xitaa aad buu noocaawiyaa. tusaale ahaan wuu nacaawiyay markaan guureynay iyo nalalkii buu inoo xiray”

Annie Ipsen oo ka sheekeenaya ahaanshada qoys saaxiibtinimo ey utahay Legese
Ghide oo ka yimi wadanka Erataria.



FOTO: JOHNNY WICHMANN



Laanqeyrta Cas iyo DRC Danish Refugee Council waa labada urur ee ugu waaweyn Danmark markey noqoto shaqooyinka tabaruca ah. Anaga ayaa ka dambeena mashruuc dhalka oo dhan ah oo lamagac baxay *Venner Viser Vej*. Kaas oo ah mid tabaruceyaashu ey ku caawinayaan dadka qaxootiga ah si ey unoqdaan kuwo firfircoon oo qayb ka noqda ah bulshada dhaanishka iyo suuqa shaqada ba. venneriservej.dk